Siyaasadda JICEA- Daabacaadyada Ardayga ee La Xariira-Dugsiga (Lambarka sirta ee Daabacaadyada)

Ujeedada laga leeyahay daabacaadyada ardayga ee uu dugsiga-kafaalo qaado waa in uu ardayda siiyo ama u oggolaado khibrad warbixineed, qoritaan, soo saarid, iyo fahanka luuqadda iyo saxaafad masuul ah. Wargaysyada dugsiyada waxay kaloo leeyihiin ujeeddo kale oo dheeri ah taasi oo ah faafinta macluumaadka la xariira-dugsiga kuna saabsan xubnaha beesha dugsiga.

Guddigu wuxuu ogsoonyahay in daabacaadyada ardayga ee uu iskuulku-kafaalo qaado ay yihiin fagaare dadweyne ardayduna waxay ku guubaabinayaan in ay si xor iyo cabqari ah u cabiraan aragtidooda ku aadan xudduudaha sharciga siyaasaddan iyo gobolka iyo dowladda dhexe.

Daabacaadaha ardayga ee dugsiga-maalgeliyo

1. Ardayda dugsiyada dadweynaha waxay xaq u leeyihiin in ay si xor ah ugu hadlaan saxaafada, mana jiro wax hadal ah oo daabacaadda ardayga ku jira, hadii uu yahay qoraalkaasi mid uu dugsiga-maalgeliyo ama mid kale, kaas oo la mamnuucayo lagana celinayo in lafaafiyo aan ka ahayn noocyada hadalka lagu sharxay qaybta #3aad ee hoos ku qoran. Lambarkan sirta ah kama celinayo talo bixiyaha ku guubaabinta hadalka ku haboon heerarka sare ee looga baahan yahay luuqadda Ingiriiska iyo saxaafada.

2. Haddii daabacaadda la faafinayo intiisa baddan laga qorey ardayda xagooda waxaa laga dhigayaa mid si guud ah looga helo dugsiga dadweynaha oo dhan, wuxuuna noqon doonaa fagaare dadweyne oo ay iska leeyihiin ardayda dugsiga.

3. Ardaydu ma turjumi doonaan waxa ku jira lambarkan sirta ah si loo faafiyo ama loo qaybiyo marba haddii uu qoraalku ka kooban yahay waxyaabahan soosocda:

a. Hadal fool xun oo galmo la xariira

b. Hadal been abuurasho ah, aflagaado ama sumcad ridis ah kaasi oo hoos imaanaya sharcigga dowladda

c. Hadal been ah oo ku aadan qof kasta kaasi oo aan ahayn qof caan ah ama aan ku lug lahayn arrimaha khuseeya dadweynaha

d. Hadal soo bandhigaya khatarta cad muuqata ee ku saabsan ficilada guddiga aan qaanuunka ahayn, ku xadgudubka xeerarka qaanuuniga ah ee dugsiga, ama carqaladayn wayn oo ku saabsan waxyaabaha iyo howsha nidaamsan ee dugsiga ama mida ku xadgudubka xuquuqda dadka kale.

4.

a. Ardayga isku dubarida daabacaadda ardayga ee uu dugsiga-maal geliyo ayaa masuul ka noqon doona xadidaada akhbaarta, fikrada iyo xayaysiinta qoraaladoodu waxa ay ka kooban tahay taasi oo u hoggaansan xuduuda lambarkan sirta ah.

b.Waxay noqon doontaa masuuliyda qoraaladu la taliyaha daabacaadyada ardayda dugsiga-maal geliyo ee dugsi kasta si uu u kormeero soo saarida qoraaladaasi oo kale iyo weliba in uu baro kuna booriyo xuriyadda iyo hadalka masuul ah iyo heerar xirfadaysan ee ku saabsan luuqadda Ingiriiska iyo saxaafada.

5. Haddii ka qaybgalka daabacaadaha dugsigau-maal geliyo ay tahay mid qayb ka ah fasalka dugsiga ama howsha taas oo lagu siiyo qadarin heerarka ama dugsiga, shuuradaha lambarkan sirta ah ma ahan kuwo la turjumi kara si uu soo dhex gal ugu sameeyo awoodda ama oggolaanshaha daabacadyada la taliyaha sida daabacaadyadan uu dugsigu-maal geliyo si u sameeyo ama u xadido shaqooyinka ardayda ka shaqaynaya daabacaadyadan la faafinayo ama ku xiga oo xukuma khibrada waxbarasho taasi oo loogu talagalay in la bixiyo.

6. Ma jiro hadal ay samaynayaan ardayda oo ay u adeegsadaan xorriyada hadalka ama xorriyada saxaafadda hadalkaas oo loo malayn doono in uu yahay hadal dugsiga siyaasadiisa ka mid ah, mana jiro dugsi degmada ah ama shaqaale kasta oo degmada dugsiga u shaqeeya, waalidka, mas’uulka sharciga ah iyo masuulka rasmiga ah ee degmada dugsiga ayaa xanbaari doona mas’uuliyada wax kasta oo dembi rayid ah hadal kasta oo lagu yiraahdo arintaasi ama laga daabaco ardayda xagooda.

7. Ma jiro wax ku jira lambarkan sirta ah oo loo fasiran karo in uu xaddidayo faafinta ama fulinta siyaasadaha Guddiiga qaanuuniga ah iyo heerarka loo qaabeeyay in looga hortago burcada.

8. Maqaaladaha iyo maadooyinka lagu daro wargayska dugsiga sare ama qoraal kale oo ardaygu leeyahay ayaa loo gudbin doonaa nidaam munaasab ah tifatirayaasha wargayska.

Xaaladaha halka arrinta faafintu ay khuseyso mawduucyada kor lagu soo sharxay waxa la soo hordhigayaa maamulaha dugisga si uu qaraar uga gaaro, wakhtiga ugu horeeya ee suurto galka ah, fadhi dhagaysasho ah ayaa la qaban doonaa. Meesha fadhiga, Ardayda arintaas ku lug leh, la taliyaha qoraalka faafinta, iyo dadka kuwaan oo kale ah intiiba uu maamulaha ka eegayo wakhti munaasib ah oo arrinta la soo bandhigayo. Dhammaan qaybaha arrinta ku lug leh waxay haysan doonaan fursad ay ku soo bandhigaan fikradahooda. Markaas kadib, maamulaha ayaa ku wargelin doona dhammaan qaybaha ku lug leh go'aanka qoritaanka. Haddii uu go'aanku yahay in dhammaan ama qayb alaabta ka mid ahi aysan munaasab ahayn, ogeysiiska ayaa xadidi doona heerka uu gaarsanyahay alaabta lagu xad gudbay. Ogaysiiska qoran ee qaraarka taas oo uu sameeyay maamulaha waxaa la bixin doonaa 24 saac gudahooda laga bilaabo saacada uu dhageysigu bilaabmay.

Haddii mid ka mid ah qaybaha aan oggolaanin xadidaada uu sameeyo maamulaha ama qorshe dejiyaha, xaq ayay u leeyihiin in ay ku qoraan fayl codsasho ah si uu dib ugu hubiyo caawiyaha

maamulaha ama qorshe dejiyaha seddax maalin gudahooda ee bilaabida xadidaadda ah. Caawiyaha maamulaha ayaa siin doona fursad qaybaha si ay u soo bandhigaan sababahooda ku aadan oggolaansho la'aanta kadibna wuxuu sameyn doonaa go'aanka ugu danbeeya ee ku saabsan codsiga si dib loogu hubiyo seddax maalin gudahooda laga bilaabo maalinta dhageysiga.

Wakhtiga, Meesha iyo Qaabka Qaybinta

Wakhtiga, meesha, iyo qaabka loogu qaybiyo ardayga qoraalada kuwaas oo buuxinaya heerarka lagu dejiyay qoraaladii hore ee siyaasaddan ayaa waxaa looga habayn doonaa qaab macquul ah maamulaha ama qorshe dejiyaha, lagu sheegay xeerarkan oo kale:

1. Qaab isku xiran ayaa loo gudbin doonaa dhammaan qaababka daabacaada

2. Lama mamnuucayo qaybinta wakhtiyada ama meelaha, ha noqoto gudaha ama dibadda dhismaha dugsiga, taasi oo aan xaqiiq aasaasi ah ku dhisnayn si uu uga mid noqdo soo dhexgal kasta ee soo dhexgala hawlaha dugsiga ka dhaca

3. Waa kuwo ku xaddidan meelaha iyo wakhtiyada qaybintu laga mamnuucay

4. Laga mamnuuci maayo qofna xaqa uu u leeyahay in uu oggolaado ama diido qoraal kasta oo la qaybiyay sida waafaqsan qawaaniinta

Siyaasaddan waa la qaybin doonaa, waa lasoo dhejin doonaa, ama haddii kale waxaa laga dhigayaa mid ay heli karaan dhammaan ardayda oo dhan iyo macalimiinta biloowga sannad kasta ee waxbarasho.

La Ansixiyay: 17 Febraayo, 1994
La muraajaceeyay: 22 Abriil, 1998

TIXRAACA SHARCIGGA: C.R.S. 10-1-103(52)
C.R.S. 22-1-120
C.R.S. 22-1-121

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO: JK, Dhaqanka iyo Anshaxa Ardayga

Qeexitaano

Qeexitaanada soo socoda waxaa lagu dabakhay shuruudaha lagu isticmaalay siyaasadaan:

1. Qaybin- faafin wayn oo ah maado laqorey qaab kasta oo ay noqoto taas oo laga dhigaayo mid si guud ay u heli karaan ardada. Taasna waxaa kamid ah kudhejinta maadooyin qoran xareeraha iskuulka taas oo uu si guud ah ugu noq noqdaan ardadayda.

2. Burcad – Kooxo ka kooban sedex ama wax kabadan kuwaas oo wadaaga dan, xiriir, ama howl, taas oo kutilmaaman denbi ama dhaqan denbi fudud ah, una qabta howsha si wadajir ah ama kelinimo ah.

3. Fuxshi

a. Qofka caadiga ah, ee lagu dabakhayo heerarka bulshada iskuulka casriga ah, wuxuu helayaa in maadada qoran, loo qaadanayo gebi ahaan, soo jiidasho danayn shahwo ah.

b. Maadadu waxay sawiraysaa ama sharxaysaa, qaab cad oo weerar ah, dhaqan galmo ah sida ficilada galmada (caadi ah ama marin habaabin ah, dhab ah ama matalaad ah), siigaysi, muujinta xubnaha qabta howsha saxarada, iyo soo bandhiga xubnaha taranka iyo halka ay kuyaaliin.

c. Maadada, hadii loo qaato si guud ah, waxay la'adahay qiimo cilmi ah, farshaxan, siyaasad, ama suugaan dhab ah.

4. Canbaarayn, been abuurad, ama sumcad ridis –been, hadal aan lahayn fursad gaar ah ama hadal qoran oo kusaabsan dad xadidan taas oo loogu talo galay in dhib lagu gaarsiiyo dadka sumcadooda ayada oo hoos loo dhigaayo qadarinta qofka uu kuleeyahay bulshada dhexdeeda ama kacabsinta dadka kale kaqayb galkooda ama ladhaqanka qofka. Hadaladaas oo kale ay kujirto kuwa loogu talo galay kashifaada qofka si ay dadwaynuhu u nacaan, ceebayn, xaqiraad, jeesjeesid, ama sharaf ridid.

5. Qofka caanka ah – waa qof raadinaya ihtimaamka dadwaynaha ama sifiican-loo garanayo guulaha uu gaaray darteed.